# Xeerka 4.10.014-P

# Taageerooyinka Ardayda Guri

**Dulmarka**

1. Ardayda guri la'aanta ah ee Degmada waxay yeelanayaan helitaan simman oo isla waxbarashada bilaashka ah, ku haboon iyo adeegyada kale, oo ay ku jiraan waxbarashada dugsiga hore ee dadweynaha, sida ardayda kale.

2. Xeerka Caawinta Guri la'aanta McKinney-Vento waxay u baahantahay in Degmada:

    a. Hubiso in ardayda guri la'aanta aysan ku dhaleeceysneyn ama ku takoorneyn si ku saleysan xaaladooda guri la'aanta;
    b. U xilsaar xiriiriyaha guri la'aan si uu u xiriiryo adeegyada si loo hubiyo in ardayda guri la'aanta ah ay ka diiwaangashanyihiin dugsiga oo ay leeyihiin fursada ay waxbarasho ahaan u guuleystaan;
    c. Samee habraac racfaan oo xalin degdeg ah ee qilaafaadka ay heli karaan dhinacyadoo dhan; iyo
    d. Bar shaqaalaha iyo maamulayaasha dugsiga wax ku saabsan xuquuqaha ardayda iyo qoysaska guri la'aanta ah adoo siinayo warbixin ku saabsan xeerka caawinta guri la'aanta iyo jaheyntaan dugsiyada iyo xafiisyada maamulka.

**Qeexitaano**

1. "Diiwaangelinta" waxaa loola jeedaa ka qeybgalka fasalada iyo si buuxdo uga qeybgelida howlaha dugsiga.

2. "Dugsiga asalka" waxaa loola jeedaa dugsiga ardayga dhigtay markii uu si rasmi ah u deganaa ama dugsiga uu ardayga markiisii ugu dambeysay ka diiwaangashanaa.

    Marka ardayga loo magacaabo sida McKinney-Vento (guri la'aan) oo uu dhammeeyo fasalka ugu dambeeya ee u adeego dugsiga asalka ah, *haddii ardayga uu weli ku jiro xaalad nololeed guri la'aan ah,* ereyga "dugsiga asalka" waa inuu ku jiraa dugsiga loo xilsaaray helayo ee loo qoondeeyay oo heerka fasalka xiggo oo dhammaan dugsiyada quudinta.

3. “Ardayga guri la'aanta” waxaa loola jeedaa shaqsiyaadka aan haysan deegaan go'an, joogto ah oo ku filan habeenkii oo ay ku jiraan:

   a. Ardayda sida ku meel gaarka ah u sii jooga guryaha dadka kale sababtoo ah waayitaanka guri, dhaqaale xumo, xaalada dhibaatada degdeg ah, dabka, masiibada dabiiciga ah, ama sabab la mid ah. tan ayaa ka mid noqon karto “dulsaarka ku meelgaarka” ama u guurista inta badan u dhaxeyso guryaha badan ee dadka kale;
   b. Ardayda ku nool albeergooyinka, hoteelada, jardiinada ama dhulalka xeryaha sabab la xiriirto hoy la'aanta kale ee ku fillan ;
   c. Ardayda ku nool hoyga guri la'aanta, hoyga rabshadaha qoyska, ama goobaha barnaamijka guryaynta hay'ada ee ku meel gaarka ah;
   d. Ardayda leh deegaanka aasaaska habeenkii oo ah meel guud ama meel gaar ah oo aan loogu tallogelin ama aan si caadi ah loogu isticmaalin sida hoyga hurdada caadiga ah ee loogu tallogalay aadanaha;
   e. Ardayda ku nool baabuurta, darjiimada, meelaha dadweynaha, dhismooyinka la dayacay, guryaha aan tayada laheyn, boosteejooyinka baska ama tareenada ama goobaha la midka ah;
   f. Ardayda soo haajirtay ee u qalma guri la'aanta sababtoo ah ardayda waxay ku nool yihiin duruufo lagu tilmaamay a.-e.

4. "Dhalinyarada aan la wehlin" waxaa loola jeedaa ardayga aan la nooleyn ama uusan taageerin waalid ama masuul sharci. Waxaa laga yaabaa inay si buuxda iskood u maqnaadaan ama ay si aan rasmi aheyn ula joogaan qof weyn ama dad badan oo aan aheyn waalidkooda/masuulka sharciga ah. *Kuma* jiraan ardayda ku jirto Daryeelka Korinta, illaamaa ardayga Daryeelka Korinta uu ka soo orday guriga korinta.

**Meeleynta Dugsiga**

Degmada waa inay, sida waafaqsan danaha ugu fiican ee ardayga, ay ku sii wadaan waxbarashada ardayga dugsiga asalka oo muddada guri la'aanta ah, ama ka diiwaangeli ardayga dugsiga degmada oo in ardayga guri la'aanta ee ku nool aag kale oo ardayga uu dhabtii ku noolyahay ayaa u qalma inuu ka qeybgalo. Ardayda guri la'aanta ee ka raadinayo diiwaangelinta dugsiyada leh shuruudaha ogolaanshaha gaarka ah ama diiwaan gelinta ku saleysan baqtiyaa nasiibka badelkii xaduudaha ka qeybgalka xaafada (sida magnet, charter, immersion, iwm.) waxay u baahan yihiin inay raacaan borotokoolada la mid ah gelitaanka sida ardayda guri aan guri la'aanta aheyn. Haddii waqtiyada ugu dambeeya ee codsiga ee noocyadaas dugsiyada gaarka ah ay ku seegeen sabab la xiriirto guri la'aanta, xiriiriyaha wuxuu la shaqeynayaa dugsiga si uu arko haddii ka dhaafid la sameyn karo haddii uu jiro boos la heli karo.

Marka la go'aaminayo danaha ugu fiican ee ardayga, degmada waa inay:

1. Qiyaastaa in ku haynta ardayga dugsigooda asalka ah inuu yahay danahooda ugu fiican, illaamaa sameynta sidaas ay lid ku tahay codsiga waalidka ama masuulka ardayga;

2. Bixiyaan sharaxaad qoran, oo ay ku jiraan bayaanka quseeyo xaquuqda looga racfaan qaadanayo, haddii ay degmada u soo dirto arday guri la'aan ah dugsiga aan ka aheyn dugsiga asalka ama dugsiga ay codsadeen waalidka ama masuulka;

3. Hubi in xiriiriyaha degmada ay kaa caawiso go'aamada meeleynta ama diiwaangelinta loogu tallogalay ardayga aan la wehlin oo tixgeliyo codsiga ardayga, oo siiyo ogeysiinta xaquuqda looga racfaan qaato go'aamada meeleynta iyo diiwaangelinta.

**Diiwaangelinta**

Degmada waa inay isla markiiba ka diwaangelisaa ardayga dugsiga la doortay xattaa haddii ardayga aysan u suurtogaleynin inuu u soo saaro diiwaanada si caadi ah ee looga baahanyahay diiwaangelinta, sida diiwaanada tacliinta, diiwaanada caafimaadka, cadeynta daganaanshaha ama dokumentiyada kale.

Degmada waa inay isla markiiba la xiriirtaa dugsiga uu ka qeybgalay ee ugu dambeeyay si loo helo diiwaanada quseeyo ee tacliinta iyo ardayga.

Haddii ardayga u baahanyahay inuu helo tallaalo, ama diiwaanada tallaalka ama caafimaadka, degmada waa inay isla markiiba u tixraacdaa waalidka ama masuulka xiriiriyaha degmada, kaasoo kaa caawinayo helida tallaalada ama diiwaanada muhiimka ah.

**Diiwaanada**

Diiwaano walba oo ay si caadi ah u illaaliso degmada, oo ay ku jiraan diiwaanada tallaalka ama caafimaadka, diiwaanada tacliinta, shahaadooyinka dhalashada, diiwaanada masuulnimada iyo qiimeynta adeegyada ama barnaamijyada gaarka ah, waa in la illaaliyaa si markaas diiwaanada loo heli karo, xilli ku haboon, markii arday guri la'aan ah uu galo dugsi ama degmo cusub, oo waafaqsan sharciga gobolka iyo federaalka.

**Qilaafyada Diiwaangelinta**

Haddii qilaaf uu ka soo baxo doorashada dugsiga, diiwaangelinta, ama u qalmida, ardayga waa in isla markiiba laga ogolaadaa dugsiga la codsaday, xalka la sugayo ee qilaafka.

Waalidka ama masuulka ardayga waa in la siiyaa sharaxaad qoraal ah ee go'aanka degmada ee la xiriiro doorashada dugsiga, oo ay ku jiraan xuquuqaha waalidka, masuulka ama ardayga si uu uga racfaan qaato go'aanka iyadoo loo marayo xalinta qilaafka ee Xeerka McKinney-Vento iyo nidaamka racfaanka, oo ay ku jiraan racfaanka ugu dambeeyo ee ku socoto Xiriiriyaha Waaxda Waxbarashada Gobolka Oregon (ODE).

Ardayga, waalidka ama masuulka waa in loo gudbiyaa xiriiriyaha degmada, kaasoo hubinayo in nidaamka xalinta loo sameeyay sida ugu dhaqsaha badan ee suurtogalka ah. Xaalada ardayga aan la wehlin, xiriiriyaha degmada waa inay hubisaa in ardayga isla markiiba uu ka diiwaangashanyahay dugsiga sugayo xalka qilaafka.

**Adeegyada**

Arday walboo guri la'aan ah waxaa la siinayaa adeegyada u dhigma adeegyada la siiyo ardayda kale, oo ay ku jiraan kuwan soo socda:

1. Adeegyada Gaadiidka;

2. Adeegyada waxbarashada ee ardayga uu u qalmo, sida:

   a. Title 1*;
   b. Waxbarashada gaarka ah;
   c. Barnaamijyada Bartayaasha af Ingiriiska;
   d. Shaqada iyo waxbarashada farsamada;
   e. Barnaamijyada kartida iyo hibada.

3. *Dhammaan ardayda guri la'aanta ah ayaa si toos ah ugu qalma adeegyada Title I, iyadoon laga eegin waxqabadkooda tacliinta hadda.

4. Barnaamijyada nafaqada dugsiga.

   a. Dhammaan ardayda guri la'aanta ah waxaa si toos ah loogu cadeeyaa sida heerka Qadada Bilaashka ah markii ay u qalmaan Guri la'aanta McKinney-Vento oo sannad dugsiyeedkaas.

5. U magacaabista heerka Guri la'aanta McKinney-Vento oo ardayga ayaa socdo laga bilaabo waqtiga aqoonsiga/u qalmida illaa dhammaadka sannad dugsiyeedkaas, iyadoon laga eegin haddii ardayga mar dambe uu guri helo. U magacaabida uma wareegto sannad dugsiyeedka xiggo. Ardayda waa in loo gudbiyaa barnaamijka McKinney-Vento sannad walba oo ay u qalmaan oo aysan ku saleysneyn xaalad nololeed hadda.

**Xiriirinta**

Degmada waa inay xiriirisaa siinta adeegyada ardayda guri la'aanta iyo hay'adaha adeega bulshada deegaanka, iyo hay'adaha ama barnaamijyada kale ee la siiyo ardayda guri la'aanta ah iyo qoysaskooda. Adeegyada ayaa sidoo kale waxaa lagu bixinayaa iskaashiga degmooyinka kale oo arimaha ka dhexeeya degmooyinka sida gaadiidka, wareejinta diiwaanada dugsiga iyo arimaha quseeya buundooyinka ku haboon oo shaqada koorsada buuxdo ama qeybta ah oo dugsiga hore si loo hubiyo in ardayda guri la'aanta ay heli karaan waxbarashada diyaarka ah iyo adeegyada la xiriira.

**Xiriiriyaha Degmada**

Xiriiriyaha degmada waa inuu hubiyaa in:

1. Ardayda guri la'aanta la aqoonsado oo lagu qiimeeyo baahiyaha;
2. Ardayda guri la'aanta ee ka diiwaangashan oo leh fursad buuxda oo simman si ay ugu guuleystaan dugsiyada degmada;
3. Qoysaska iyo ardayda guri la'aanta waxay heli karaan adeegyo oo waxay ka heli karaan adeegyo dheeraad ah adeegyada Head Start, Early Intervention iyo adeegyada dugsiga hore;
4. Qoysaska iyo ardayda guri la'aanta ah waxay helaan adeegyada waxbarashada oo ay u qalmaan, iyo sidoo kale warbixin ku saabsan iyo u gudbinada adeegyada daryeelka caafimaadka, adeegyada ilkaha, adeegyada caafimaadka damiirka, hoy iyo adeegyada guriyeynta, iyo adeegyada kale ee ku haboon;
5. Ardayda waaladiinta guri la'aanta waxaa la soo ogeysiiyay fursadaha waxbarashada iyo kuwa la xiriira ee loo heli karo ardayda oo waxaa lala bixiyaa fursado macno leh oo ay kaga qeybqaataan waxbarashada ardaydooda;
6. Ogeysiin guud oo xaquuqaha waxbarashada ardayda guri la'aanta ayaa lagu qeybiyaa meesha arday noocaas ah uu ka helo adeegyo (tusaale, dugsiyada, hoyga, maktabadaha dadweynaha, iyo qeybaha cuntada);
7. Qilaafaadka diiwaangelinta waxaa lagu dhexdhexaadiyaa habraacyada xalinta qilaafka ee Xeerka McKinney-Vento;
8. Waaladiinta ardayda guri la'aanta, ama arday walboo aan lala socon, ayaa si buuxda loogu soo sheegaa dhammaan adeegyada gaadiidka ee ay u qalmaan,

oo ay ku jiraan gaadiidka u socdo dugsiga asalka, oo waxaa laga caawiyaa helitaanka gaadiidka ku socdo dugsiga la doortay;

9. Shaqaalaha dugsiga, bixiyayaasha adeega iyo u doodayaasha la shaqeeya ardayda guri la'aanta iyo qoysaskooda waxaa loo soo sheegaa waajibaadyada xiriiriyaha.

Xiriiriyaha degmada waa inay xiriiriyaan oo ay la shaqeeyaan xiriiriyaha gobolka ODE, shaqaalaha bulshada iyo dugsiga ee masuulka ka ah siinta adeegyada waxbarashada iyo kuwa la xiriira ardayda guri la'aanta.

Tixraacyada sharciga: Tilmaamta Aan Sharciga Aheyn ee LA ISTICMAALAY (Luuliyo 27, 2016); Xeerka McKinney-Vento – Waxbarashada loogu tallogalay Carruurta Guri la'aanta iyo Barnaamijka Dhalinyarada, sida lagu badelay Diseembar 2015 sida waafaqsan ESSA; ORS 109.056; ORS 327.006; ORS 339.115; ORS 339.133; ORS 433.267; OAR 581-021-0045 to – 0046; La qaatay 8/14/18.